

Tallooyinka Waxbarashada Khadka ama onleenka Ah:

Qoysaska CPS ee Ardayda Dugsiga Sare (Fasalada 6-12)



Maadaama dhismayaashii iskuulka la xiray, dhammaan kuweenaan jooga Cambridge Public School (Iskuullada Dowliga ah ee Cambridge) waxaan si aad ah ugu dadaaleeynaa sidii aan ku heli lahayn habab hal abuur leh oo waxbarashada khadka ah loogaga dhigo mid madadaalo leh, mashquulin leh, oo guul u ah ardada da'adoodu kala duwan tahay. Halkan waxaa ku yaal qaar ka mid ah tilmaamaha loogu talagalay qoysaska sidii ay ardada uga dhigi lahaayeen kuwo firfircoon, mashquulsan, oo caafimaad ku jooga guriga.



Sameeyso jadwal joogto ah, oo si joogto ah u raac.

Si lamid ah caruurta yaryar, dhalinyarada waxay guul gaaraan markii uu jiro qaab dhismeed iyo jadwal joogto ah. Tani in la raaco waxay noqon kartaa mid ku adag ardada waaween, laakiin waxaad soo jeedin kartaa inay sameystaan jadwal maalmeedkooda u gaarka ah. Xoogga saar shaqada dugsiga adigoo si macquul ah u kordhinaya. Diirada aad ha u saarin inuu noqdo jadwal adag maadaama hadafka ugu weyn yahay inuu bixiyo dareen joogto ah, oo leh waqti waxbarasho, madadaalo, jimicsi, cunno, iyo hurdo.



La xiriir macallimiinta ardeygaaga.

Macallimiintu waxay ku dadaalayaan inay joogteeyaan xiriirka labageesoodka ah ee ay la yeelanaayaan ardayda intii suurto ah. Macallimiinta waxay ardada kula xiriiri doonaan taleefanka, iimayl, Ablikeeshanka Remind app, iyo siyaabo kale. Macallimiinta dugsiga sare ayaa diyaar u ah inay taageeraan ardada waqtiga dhabta ah inta lagu gudajiro jadwalada ah 30-45 daqiiqadood maalin kasta. Ardayda dugsiga sare waxay ka qeyb galayaan casharada Google Meet waxayna la xiriiri karaan macallimiinta inta lagu jiro saacadaha shaqada. Weydii ardaygaaga jadwalkooda, mashaariicdooda, iyo haddii ay ka qeybgaleen xiisadaha fasalka. La xiriir macallimiinta ardeygaaga, deynka, maamulaha ama xiriiriyaha qoyska haddii aad u baahan tahay caawimaad.



Sii ardada fursadaha madaxbannaanida iyo mas'uuliyadda.

Ardada ka qeybgeli shaqooyinka guriga dhexdiisa iyo/ama inay caawiyaan deriska waayeelka ah (si fogaansho leh, ama iyago oo xiranaya maaskaro oo ku dhaqanmaya kala fogaanshaha bulshada), si ay u dareemaan dareen guul. Ku caawi ardada fursadaha ah inay xiriir la lahaadaan asxaabtooda iyadoo la isticmaalayo taleefan iyo wada sheekeysiyada fiidiyowga ah. La soco isticmaalka warbaahinta bulshada oo xusuusi ardada in dhammaan macluumaadka ay ka akhriyaan khadka tooska ah aysan sax aheyn. Ku dhiirrigeli inay weydiiyaan su'aalaha ku saabsan sheekooyinka wararka ee abuuraya jahwareer ama walaac.



La hadal ardaygaaga.

Wax ka barashada guriga waxaynoo yahay isbedel weyn dhammaanteen.. Ardayda waaweyni qaasatan waxay u xiisi doonaan saaxiibadood waxayna ku jahwareeri doonaan inay seegaan nashaadaadyada muhiimka u ah ee la qabto dhamaadka sanadka, gaar ahaan haddii ay dhameynayaan dugsiga sare ama iskuulka sare. Ardeygaaga kala hadal waaya-aragnimada isku dayga wax-barashada xilliga iskuulada ay xiran yihiin. Ku caawi ardeygaaga inuu ka guuleysto wixii cabsi ama welwel ah adigoo u nasteexeynaya, dhiirrigelinaya, kuna amaanaya inuu si adag u shaqeeyo waqtiyada adag.



Dibadda u bax oo jimicsi samee.

Ku dhiirrigeli ardaygaaga inuu firfircoonaado. Jimicsi joogto ah ayaa ka caawin doona joogteynta caafimaadkooda jireed iyo maskaxeed. Haddii ardaygaaga uu ka cayaari jirey kooxaha isboortiga, ku dhiirrigeli inay sii wadaan tababarka wadnaha iyo xoogga jirka ee guriga dhexdiisa ama dibeddiisa iyagoo xiran maaskaro oo ilaalinaya kala fogaanshaha bulshada (ugu yaraan 6 fiid) laga fogaado dadka kale. Xitaa maalmaha roobka, ardeyda waxay ku mashquuli karaan nashaadyada iskala bixinta iyo jimicsiga guriga dhexdiisa lagu sameeyo.



Iska baashaal!

Xilligan la joogo maahan xilligii "shaqada oo aan cayaar lahayn." Aad ayey muhiim ugu tahay in qoysaska ay raadiyaan habab hal abuur leh oo ay ku wada qoslaan oo ay si wadajir ah ugu madadaalaan. Daawo filimaanta, dadka kale la wadaag fiidiyowyaal, sheeg kaftan, ciyaar cayaaro, wax kari, hees ama si wada jir ah u dheela. Samee waxkasta oo qoyskaaga ka farxiya.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo www.cpsd.us/athome. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad ka welwelsan tahay, fadlan la xiriir dugsiga cunuggaaga, ama iimayl ku dir cps@cpsd.us.